JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

MAJALADDA XEERKA

مجلة القانون

RIVISTA GIURIDICA

The half-yearly Law Review

Volume 5 June 1977 Number 10

Editor : YUSUF ELMI ROBLEH

Assistant Editor : YASSIN HAJI HUSSEN

Published by the Ministry of Justice

and Religious Affairs

WAX ALLA WIXII KU SAABSAN BAJALLADA WAA
IN LAGU SOO HAGAAJIYAA
WASAARADDA CARSOORKA IYO DIINTA
MUQDISHO
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

EDITORIAL COMMITTE
EDITOR: YUSUF ELMI ROBLEH
ASSISTANCE EDITORS: YASSIN HAJI HUSEEN
ADEN MOHAMED IBRAHIM
MOHAMED HASSAN TANI
ABDIRASHID SHEIK AHMED
MANJIT SINGH
YASLIM ABDULLA
AHMED HAJI MOHAMED

All correspondence letters of the editor, comments, notes, Article must be type and books for review should be addressed to: The editor

The law half-yearly Review,

Ministry of Justice and Religions

MUQDISHO

Somali Democratic Republic

TUSAALOOYINKII MADAXWEYNAHA

TUSAALOOYINKII MADAXWEYNAHA

Bulsha kasta oo Caafimaad ku dhaqanta, horukac gaarta, aasaaskeedu waa Caddaaladda, Caddaaladduna waxay ku taxaluqdaa bulshada dhaqankeeda iyo kasmadeead.

21.12.1976

TAARIIKHDA IYO HORUMARKA GARSOORKA SOOMAALIYEED

GARSOORKA GUUD AHAAN

Garsoorku waa awood shicbigu iska leeyahay, kuna aaminey, dad isagoo ka mid ah, karti iyo awoodna u leh, wuxuuna ku dhisan yahay isku kalsoonaan iyo isku aamin qabid la kala beddesho, iyagoo labada dhinaca ku wada shaqaynayaan xeer ay wada degsadeen, sabablaoo ah, haddii shicbigu awooddaas Garsooraha u dhiibay kuna aaminay, waa in awooddaas shicbiweynuhu u dhiibey kuna ilaashanayo, markaas u sidaas arrinta Garsooruhu u garto, wuxuu isia markaas garanayaa, in hawshaas iyada ah, lagu fiirinayo, si hagaagsanna markaas ayuu u gudan karayaa.

Haddii shicbigu awooddaas aad u culus u dhiibto dad aan awood iyo karti u lahayn, amase mas'uuliyadda qaadi karin. amabase haddii Garsoorihii muhiinnadaas weyn lagu aaminey awooddii la siiyey, danahiisa gaarka ah ugu shaqeysto, markaas ayaa wareer iyo is afgaran wax meeshaas soo galaan, qayladuna badataa.

Dadyowga adduunka jooga sida ay isugu khilaafsan yihiin, Diinta, Caadooyinka, Hiddaha Dhaqanka, oo ay ugu kala tagsanyihiin: wax garashada, horey u marka, luqada, ayay isugu khilaafsan yihiin, uguna kala tagsanyihiin Garsoorka iyo Ummuuraha la xiriira.

Waxaa jirey Adduunka Waddamo badan oo la isticmaarsaday, xuquuqdoodii oo dhanna looga qaalib noqday, xeerarkoodii iyo caadadkoodiina, wixii isticmaarsadihii lagu beddelay, welina xeerarkii isticmaarka iyo dhaqankiisi lagu xukumoo iskastoo ay xornimco magaca ah qaateen, amase ayan isticmaarkiiba ka bixin. sida Suud Afrika, Namiibiya, Rodeesiya iyo kuwo kale.

Waddanna xor ma noqon karo, haddii Garsoorka xagiisa uusan xor ka ahayn, sababtoo ah, Waddanka horey u kiciisa, amaankiisa, sinnaanta dadkiisa. Caddaaladdiisa ijtimaaciga ah, iyo wixii la mid ah oo dhan. waxaa lagu heli karaa, Garsoor toosan, oo dadka Waddankaas u dhashay niyo sami iyo kalsoonaan ku maamulayaan.

Waxaa jira. waddaammo badan oo xornimadooda qaatay 1960, tagsoo ahayd waqtigii Da.keennu qaatay Xornimadiisa, waddannadaas oo aan laa iyo maanta ka xoroobin xaggaa Garsoorka, sababtoo ah

in ay weli Garsoorkooda maamulayaan Garsoorayaal shisheeye ahi amase xeerar shisheeye, nasiib wanaagse waddankeenna arrintaas iyada ah tallaabooyinkii ku habboon ayuu ka qaaday. eexr shisheeye iyo Garsoore shisheeye ah waa ka xoroobay.

Haddii la doono in laga hadlo taariikhda Garsoorka ee da.ka Soomaa.iyeed, waxaa lama huraan ah in loo qaybsho, waqtiyada hoos ku qoran, si loo ogaado waqtiga sidii uu ahaa:

1) Waqtiyadii ka horreeyey isticmaarka, taasoo aynu orankarno: ilaa intii Diinta Islaamka.ay Soomaa.iya soo gashay.

2) Waqtiyacii isticmaarku dalkeenna haystay magac kastaba ha sheegtee:

3) Waqtiyadii magaca istiqlaal ku sheegga lagu maamulayey:

4) Waqtigii kacaanka barakaysani, maamu.ka hayey.

B) Waqtiyadii ka horreeyey isticmaarka

Diinta Islaamku markii ay soo gaartay da.keenna Soomaaliyeed, taasoo sida aan qabo ahayd sannadihii hore oo uu ka soo dhashay Jasiirada-Al-Carab, haddii ay ugu dambeysana ahayd. Qarnigii hore oo Hijradii Nebi Maxamed Naxariistii Korkiisa ha ahaatee, bartamaheedii, ilaa iyo markii isticmaarku soo galay dhulkeenna, Garsoorka waxaa loo cuskan jirey labada masdar oo hoos ku xusan;

1) Shareecada Islaamka, oo aad kalsooni iyo aqoon .abadaba loo qabey,

2) Caadada iyo dhaqanka, kuwaasoo dadka waxgaradka ahi ay maamuli jireen, taasoo mararka qaarkoodna ay shareecadaba ka hormarin jireen oo ay oranjireen (war Shareecadu inama nooneyso) iyadoo aad Ulajeeddada ka fahmeyso in ay xuddundda (qiyaasta karbaashka gacan gooynta iyo wixii la mid ah) dhibsanayaa:

Shareecada Islaamka, dadku si aad ah ayay u dhawrijireen, uguna camalfali jireen. khaas ahaan, wax a.la wixii ku saabsan xeerka qoyska (Axaa.ushakhsiya), kuwaasoo ay ka mid yihiin: Nikaaxa-furriinka Dhaxalka Dardaaranka Waqafka Nasabka iyo Dacwada Ilmaha haddii laysku qabto anaa dhalay iyo maye anaa dhalay, nafaqada iyo wixii la mid ah.

Waxaa kale oo Shareecada kali ah loogu camalfalijirey, wax alla wixii ku saabsan cibaadada Ilaaheen, iyadoo si aad u waafasqan Diinta Islaamka locgu dhaqmi jirey. Caadadu waxay ahayd wax aad laysula eggel yahay, laguna wada dhaqmo, qof diidi karana uusan jirin. Sabbtoo ah, dadku in uu la dhacsanaa in dan ay u tahay: ammaankooda guud, haddii ayan u hoggaansaminna, xasilloonaani ayan jirayn.

Garsoorka shareecada waxaa maamulijirey, niman culimo ah oo Dawladdu Garsoorayaal u magacawday, Sharcigana aad u yaqaan. bal eega maqaalada ku qoran wargeyska «Horseed» lam. 238, soo baxay 6.7.1976, oo cinwaankeedu yahay: Mamlakatu Muqdisho Soomaaliya taariikhda baro), taasoo uu ku faafiyey waxyaalihii laga qoray: Ibna Baduuda oo Carab Reer Maqribaha.

Ibna Baduuda wuxuu ka sheekeeyey Dawladdii Soomaaliyeed ee xukumeysay Muqdisho muddo hadda laga joogo 645 sano, taasoo markaas uu xukumahayey nin Sultaan ah oo la oran jirey Sultaan Abuukar sheekh Cumar, sannadku markuu ahaa 1331 Dh. N. Ciise.

Ibna Baduuda markii uu ka warbixinayey Shir weyn oo Caadi ahaa lagu qaban jirey Daarta Sultaanka maalinta Sabtida wuxuu yiri: (markay tahay maalinta Sabtida, waxaa albaabka Daarta Maligga Abuubakar sheekh Cumar shir ahaan u imaan jirey: Shaqaalaha iyo Madaxda Beledka, waxayna fariisan jireen Daarta dibeddeeda. Waxaana hortaa soo geli jirey Garsooraha hore. waxaa ku xiga Culimada Diinta, Asharaafta, Mashaa'ikhda Xujeyda.

Garsooraha hore wuxuu ku fariisan jirey kursi khaas ah, markaas ka dib ayaa Sultaanku Fariisan jirey markaas kaddib ayaa waxaa soo gala Xoghayayaasha Dawladda, madaxda jeyshka.

Nidaamkaas Ibni Baduuda ka war bixiyey dhaqanka Soomaaliidu sida uu ahaan jirey muddo haatan laga joogo 645 sano. wuxuu soo gaaray ilaa iyo markii isticmaarku la wareegay xukunka dalkeenna, muddo hal qarni ku dhowaad laga joogo. Wuxuuna ku tusinayaa, sida Diinta Islaamka iyo Garsoorka, iyo weliba dadka labadooda ku shaqa lihi, ay ugu horreeyey dhaqanka Soomaaliyeed.

Caadada iyo dhaqanka

Sidii aan horey u soo sheegnay, caadada iyo dhaqanka, waa wax-

yaalaha Soomaalidu aad ugu dhaqanto, iyagoo u fiirinaya maslaxadooda guud, in aan weyni ugu jirto, inkastoo ayan caadada iyo dhaqanku ahayn wax qoran, si Diinta Islaamka la mid ah ayay ugu dhaqmaan. sida Dawlado waaweyn oo Ingiriisku ka mid yahay ay ugu dhaqmaan, waxaana maamuaa Duqowda iyo ragga indheergaratada ah.

Xagga Garsoorka haddii aan u bayrno, si aad ah loogu shaqayn jirey caadada. iyagoo ku magacaabi jirey «Xeer khaas ahaan waxaa xeerka looga dhaqmi jirey, meelaha Baadiyaha ah, oo bilaanka ka fog, maxaa yeelay, had iyo jeer dacwooyin waaweyn oo xataa dad la dilay iyo dhaqan la kaa qaaday. ayaa baadiyaha ka dhacaan, iyadoo beledka aadistiisu, ama kharaj badan keenayso, amase lagaba yaabo in daahintu dhibaatooyin waaweyn u keento.

Haddii laba qolo ay dad iska dilaan, waxa markiiba soo dhexgeli jirey Duqowda deriska labada qolo u ah. waxayna ku qancin jireen in aan dagaal dambe loo noqon, waxayna arrinta ku dhammayn jireen in dayo la kala qaato, iyagoo sii hormarinaya 10 halaad oo lagu magacaabi jirey «Rafiso» Magta inteedii kalana, muddo ayay u qaban jireen taasi waxay ahaan jirtey Garsoor aad u qaayo weyn oo Soomaalidu ku dhaqmi jirtey.

Mushkiloyinka yaryar oo laba qof dhexmara waxaa la horgayn jirey, nin masha'ikhda deriska ah ka mid ah, iyadoo laysla oggol yahay. Markii Sheekhaas go'aan gaaro. nin aan ku raali ahayni, wuxuu afmuggii ku oran jirey «Sharcu-Ilaahi cinda qeyrik Gartaadii waan ceshay»

Nin kale ee Culimada ka mid ah, ayaa gartaas mar labaad loo geeyaa. Haddii go'aankiisa la oggolaan waayo. Shiikh Saddexaad ayaa la horgeeyaa. iyadoo mar walba sidii nidaamka dacwaddu ahayd lagu socdo, taasoo ah,in horta hore dacwooduhu bilaabayo dacwadiisa. marka ku xigana dacweysanuhu ka jawaabayo, mar saddexaadkana Garsooruhu markhaatiyada dhegeysanayo, kaddibna go'aan kama dambeystii ah. ayuu soo saarayaa, go'aankaas saddexaad, nin waliba waa og yahay in uusan garta ka soo baxda celin karin ee uu kama dambeystii yahay taas macneheedu waa nidaamka caalamiga ah, ee Racfaanka ee maanta aaduunka oo dhami ku shaqeeyo. Soomaalidu na weligeed ku soo dhaqmi jirtey.

Nin odayaasha Soomaaliyeed ka mid ahaa ayaa wuxuu yiri: Haddii dacwo la ii keeno, shan waxyaalood ayaan go'aankeyga ku qaata ee bal mid lixaad ha lagu daro; muddaci muddacaa caleyhi marag dhaar iyo maslax).

GARSOORKA WAQTIYADII ISTICMAARKA

Garsoorka Dalkeenna waqtiyadii isticmaarkii xukumayey. magac kastaba ha wato wuxuu ahaa mid isticmaarka gacanta ugu jirta, sidii hadba isaga dani ugu jirto ayuuna ku maamuli jirey, wuxuuna weligii ku dadaali jirey, Ummadda dalka ku nool inuu dhaqan rogo, asagoo in yar yar ugu baabi'inaya intii uu karikaro, Diintii, Caadooyinka, dhaqankii iyo hiddihii dadku ku dhaqmi jirey, isla markaasna ku abuuraya intaas aan soo sheegnay oo waddankiisa lagaga dhaqmo.

Xagga Garsoorka wuxuu ku dadaalay in uu yareeyo awooddii Shareecada Islaamku Dalka iyo dadkaba ku lahayd. wixii dacwooyinka hoos ku xusan ku saabsan asagoo la wareegay, asagoo ku xukumay. sharciyadii dhulkiisa: dacwooyinka ciqaabta, dacwooyinka Idaariga, amase maamulka, dacwooyinka waaweyn ee Madaniga, dacwooyinka dagaalka ka dhexdhaca laba qolo, dacwooyinka dadka Soomaaliya u dhaxhay iyo dad ajnebi ah dhexmara wax kastaba ha ahaadeen amase qola kastaba ajnebiga ha ahaade.

Isticmaarku awoodda Garsoorka, asaga kaligii ayaa maamuli jirey, nin uu ka tala gelin jireyna ma jirinin. Maxkamadda Sare, Maxk. Gobolka iyo Xafiiska Xeer Ilaaliyaha, Rag caddaan ah ayaa madax u ahaan jirey, ilaa kacaanka dhalashadiisii looga soo dhowaado.

Isticmaarku midab kala sooc ayuu ku samayn jirey Garsoorka iyo Garsooradaba, sidaas darteed, Garsoorrada caddaanka ah wuxuu ku magacaabi jirey Garsoorihii caadiga ahaa (Ciudice Ordinario) Garsoorihii Waddaniga ahaana wuxuu ku magacaabi jirey, Garsooraha Shareecada (Ciudice Shareitico), asagoo ulajeedoodiisu ay tahay Garsoore aan caadi ahayn.

Sannadku markuu ahaa 1957, nin Garsoore ah oo Talyaani ah. lana oran jirey Dr Millano, Maxkamadda Rafcaanka Muqdisho Guddoomiye ka ahaa, dersine ka bixinayey xeerka Nidaamka Garsoorka, ayaa dersigii dhexdiisii wuxuu yiri Garsoorayaasha Soomaaliyeed awoodihii ay Garsoorka ku lahaayeen. waa laga wareejiyey waxaana ugu dambeeyey diyooyinka, oo loo wareejiyey Maxkamadda Gobolka

Sidaan horey u soo sheegnayna Maxkamadda Gobollada waxaa ka wada shaqeynayey Garsoorayaal Talyaani ah. Aniga nafteyda ayaa su'aal u jeediyey, waxaana iri: (Diyada shareecadu waxay u kala qaadday, diyo kas qof loo dilay ku saabsan, mid kas la'aan loo di-

ley iyo kuwokale. Diyo fudud iyo diyo culus, waxaana cad inaan Garsooraha loo wareejiyey uusan waxba ka aqoon qaybahaas. Sideeduu u xukumi doonaa? Xeerkeebuuse u cuskan doonaa? Jawaabtiisii waxay noqotay (Nin sharciga yaqaan ayuu kala shawrayaa). Su'aal baan ku celiyey oo waxaan iri maxaa Garsooraha sharciga aad u yaqaan loogu qaaday, haddii kan loo wareejiyey, marwalba nin aan Garsooreyahay u warsanayo, sidii qofkaas loogu xukumi lahaa? wuxuuna yiri waa amuur siyaasad ah)

Horey baan u sheegay in isticmaarku weligii ku talo jirey in uu baabi'iyo Diinta Islaamka, caadadka iyo dhaqanka wanaagsann ee dadweynaha Soomaaliyeed ku soo dhaqmi jirey, asagoo isla markaasna dalka iyo dadkaba dhaqan rogay, oo kuwii dalkiisa ku abuurayo, si uu uga dhigo dhul uu leeyahay, waxyaalo badan banaan ka sheegi karaynaaee warka dheeraantiisa ayaan ila habboonayn qisooyikaan gaaban waxaan idiinku sheegay, miisaa ahaan waana kuwo aan ka dooday, oo aan daahirsaday in aan ka soo horeedo waqtigoodii

Sannadku markuu ahaa 1954, Annagoo dhowr iyo toban Garsooree ee Soomaali ah, waxaa Xafiiskiisa noogu yeertay, Guddoomiyihii degmada Banaadir oo dhalashadiisuna Talyaani ahayd. wuxuuna nagu yiri: (Waqti dhow Waddankiinnu Istiqlaal ayuu qaadanayaa, waxaana idinka hor imaanaya mashaakil badan oo aan xeer u dhignayn, hadhowna idinka Garsoorayaasha ah xal'i idinka doonaya loona baahan yahay in aad xeer u heshaan, mashaakilkaas oo ka mid yihiin; Diyada, Yaradka, dhibaadda, Sooryada gabdhaha iyo wixii la mid ah.

Sidaas darteedna waxaa la idin farayaa in aad sharci u soo suubisaan. adinkoo misaal ahaan, ninkii la dilo Diyadiisa, qabiilkii wax dilay, guud ahaan ugu xukumaya, yaradkii ninka gabadhiisa la guursado, kii guursaday ugu xukumaya.

Jawaab ahaan waxaan ugu celinay: (Annagu Garsoorayaal ayaannu nahay, xeerkii waddanka u degsan ayaan wax ku xukumaynaa, ee ma ahin xeer dejiyeyaal) markaas kaddib xeer foolxun ayay samaysteen.

Qisadan yarta ah waxaa ka muuqata in shisheeyihii waddanka Siyaasaddiisa hayey, ay xata ilaa muddadaas kor ku xusan ay raadinayeen, wax xeer ku sheega oo ay ku kala geynayaan Ummadda is haysata, Garsoorayaasha waddankana ay gaashaan uga dhigtaan oo dadweyna-

ha tusaan,. in Garsoorayaasha Soomaaliyeed soo samayn sharcigaas, waanse ku gacan sayrnay

Garsoorayaasha Soomaaliyeed, guri iyo gunno midna ma lahayn mushaarkooduna waxay ahayd Garsooraha Shisheeyaha tiisa oo toban meelood loo dhigay meesheed, waa ka sii yarayd wuxuuna ku noolaa badeecadda waddankiisa iyo nolosha dadweynaha oo iska fududayd darteed.

Muddadii isticmaarka waxaan ku soo xirayaa, inaan Garsooruhu ku shaqayn jirin iraaddo iyo awood shacbiga soomaaliyeed u leeyahay, usan una shaqaynayn maslaxad iyo dano dadka waddanku ay wataan.. ee uu ku shaqaynayey, danaha isticmaarka iyo iraaddadiisa, dadkuna weligii ku ducaysan jirey: (Ilaahow naga qaad oo naga koryeel isticmaarka iyo waxa uu wataba). Ilaahayna ugu dambeyntii ka aqbalay.

WAQTIGII ISTIQLAALKA

Istiqlaal ku sheeggii muddadii dalkeenna uu maamulayey oo 9 sano ahayd, dadweynuhu wuxuu maleynayey, in arrimaha Garsoorku sidii hore ay dhaami doonaan, waxna laga beddelidoono, sida ay u maleysanayeen oo kale, in xaaladaha kale: Siyaasadda, dhaqaalaha, tacliinta iyo ammuuraha kale oo Ijtimaaciga ahi ay isu beddelayaan. Hase yeeshee taasu ayan dhicin, sababtoo ah, ilaa iyo kacaanka horyareydiisii, Garsoorka waxaa maamulkiisa hayey, nimankii shisheeyaha ahaa, oo waqtigii isticmaarkii maamuli jirey, waqtigaasoo ninkii Guddoomiyaha ka ahaa Maxkamadda Sare, laga saaray Guddoomiyanimadii looma diray dalkiisii.

Inkastoo ninkaas eryiddiisa, dhinac ahaan loo haystey, in ay tahay Garsoorkii dalkeenna oo la xoreeyey. xaqiiqdu waxay ahayd, in loo eryey siyaaso ay wadatay xukumadii markaas dhulka maamuleysay, iyadoo ulajeedday, in uusan Intikhaabka soo dhowi caddaalad ku dhicin,, maxaa yeelay, waxay ku tuhumsanayeen, in uu caadilnimo, uu ku xukuma dacwooyinka ka inaan kara Elesyoonahaas.

Hadalkayga waxaan ku soo xirayaa, in aan wax isbeddel ahi ka dhicin xagga Garsoorka muddadii sagaalka sano ahayd, oo kacaankii barakaysan ka horeysay, Istiqlaal ku sheegana dalku ku dhaqmayey, ha ahaato xagga xeerarka Garsoorka, amase xagga Garsoorayaasha ba

iskabadaa in wax iska beddelaane, waxaan orankaraa, in muddaqaasi ahayd tii ugu xumeyd. intii Garsoorka Dalkeennu soo maray. maxaa yeelay, boqolkii sano oo isticmaarku dalka maamulayey, ma ay dhicin, inkastoo awoodda Garsooraha Soomaaliga ahi u leeyahay ay xagga xeerka maxduud ay ka ahayo, haddana ma ayan dhicin in Garsooraha Soomaaliga ah lagu soo fara geliyo, kiis uu markaas faraha kula jiro, maxaa yeelay, taasoo kale way ka xishoon jireen shisheeyihii dalka maamulayey. Istiqlaalka musayafkaa intii aan haysanneyse, way dhici kartey ragga madaxda ahi in ay soo farageliyaan kiis khaas ah oo nin Garsoore ahi gacanta ku hayo, ilaa iyo intii uu Garsooraha ku qanciyo, inuu sameeyo: eex laaluush, qaraabokiil iyo wax la mid ah. Sidaasina waatan ugu xun oo waddan Caddaaladdiisa iyo horay u marintiisa lagu qarribi karo.

Waqtigii Istiqlaalka ayaa meel laba qolo ku dirirtay nin ku dhaawacmay Garsoore Soomaali ah ayaa dacwaddii qaaday, Ninkii dhaawacay geystay wuxuu ku xukumay 175 neef oo geel ah, asagoo waliba macaan ee aan is daaficin loogu yeerin waxna qiran, taasina ay ku wacnaya niman madax ah, oo Garsoorihii ku riixeen in uu sidaas sameeyo, nimankaasoo markaas awood u lahaa in ay Garsooraha wax yeeleeyaan, haddii uusan sidaas yeelin.

175

Ninkii geela lagu xukumay Rafcaan ayuu qaatay markuu arrintii ogaaday. Maxkamadda Sare ayaa waxay xukuntay. in Maxkamadda Rafcaanka oo dacwaddaas awood u lihi kiiskaas ay gasho. Nin weyn oo masuul ahaa oo ninka geela loo xukumay ay qaraabo yihiin, ayaa Garsoore Degmo oo aan weligii Maxkamadda Rafcaanka ka shaqayn iska magacowday, in Rafcaankaas uu galo: Degmo aad u yar oo aan ahayn magaalooyinkii Gobollada oo Rafcaanka lagu geli jirey.

Garsoorihii oo Wasiirkii magacowday la ballamay ayaa Degmadii yarayd tegey, kaddibna asagoo aan waxba is shiddeyn,, Maxkamadna fariisan, dadna isu wicin, Rafcaanle iyo Rafcaansane midna, ayuu xukun uu maqsuud kaga dhigyo Wasiirkii magacowday soo qortay, una keenay, Wasiirkuna in loo fuliyo weydiistey.

Waxyaalihii waqtigaas Garsoorka Gudihiisa ka dhici jirey, waa waxaan la soo koobi karin, inkastoo aan ka mid ahaa Ragga Garsoorayaasha aima mabsuud kama ahayn, wax aan qaban karaana ma jirin, waana Caddaalad darradu kacaanku ka gilgishey.

WAQTIGII KACAANKA

Muddadii yarayd ee kacaanku dalkeenna maamulayey, ahaydna7 sano, waxyaalo waaweyn oo la taaban karo lana arkikaro ayaa Garsoorka iska beddelay, sida dabeecaddii, iyo habkii dhismaha oo dhan isu beddeleen. xagga siyaasadda. xagga dhaqaalaha, xagga taciinta, xagga amuuraha ijtimaaciga, xagga bulshada iyo dhan walba oo loo fiirsho.

Haddii aan waxyaalo yaryar ka taataabto waxyaalaha iska beddelay Garsoorka, waxaa ka mid ah kuwa hoos ku xusan:

1) Nin shisheeye ah jinsiyad kasta ha watee, waa laga dhawray imuu Garsoorka Dalkeenna sifo kasta ku soo dhexgalo, isagoo kacaanku waaya aragnimadiisa iyo waxyaalihii hore ee Soomaaliya ay soo martay ku taamilo qaadanaya waxaana Garsoorihii lagu aaminey, soo man Soomaali ah oo waddanno dibedda ah, iyo waddanka gudihiisaba wax ku soo bartay, Shahaadooyinka Sharciyadana wata.

Arrintaas shisheeyaha ka kaaftoonkiisu, ma aha Garsoore oo keli ah ee meel walba ee Dawladda laameheeda ka midaba kacaanku sidaas ayuu ka yeelay, iyadoo ulajeeddadiisu tahay, haddii aynu weligeen hawlaheena ay inooga shaqeeyaan dad shisheeye ah, goormaynu weexeenna qabsanaynaa, amase aynu si habboon u baranaynaa hawlaheenna? taasi waxay dhaqsay isku kalsooni iyo geesinnimo, dhallinyaradii Sharciyada soo baratay isku kalsoonaato, shaqadoodana si wacan uga soo baxaan;

Halkaan waxaan idiinku baraarujinayaa tirakoob yar oo aan idinku caddeynayo faraq ku jira, dadkii Garsoorka ka shaqayn jirey markii kacaanku dhashaya 1969, iyo inta uu gaaray maanta oo toddoba sano laga joogo:

	Sannadka	1969	Sannadka	1976	faraqa
1)	Garsoorayaal	110		230	120
2)	Kaaliyayaal	64		200	136
3)	Gaarsiiyayaal	50		150	100
		224		580	356

Ruux ahaan tiro koobkaas, iyo isbeddelka aad u weyn oo muddada toddobada sano gudaheeda ku dhacay, wuxuu ku tusinayaa sida kacaanku ihtimaan xoog leh u saaray, sidii Garsoorka waddanka aad ugu hormarin lahaa.

2. Xeerarkii Garsoorka ee kacaanka ka hor waddanka yiilley, oo tiro ahaanna u yaraa, tayo iyo wax tarnimaana ahaayeen kuwii isticmaarku horey danihiisa u degsadey, ay kana dhadhameysey inay ku jiraan waxyaalo danihiisa ahaa, waa laga wada beddelay, wax alla wixii aan dadka Dalka Soomaaliyeed, dani ugu jirin. Waxaa xeerarkaas ka mid ah: xeerka ciqaabka, xeerka habka ciqaabka, xeerka Nidaamka Garsoorka xeerka Jeelasha, xeerka Shaqaalaha iyo waxyaabo la mid ah. Xeerar cusub oo Garsoorka Dalkeenna aad muhiim uga ah hortiina booskooda Xeerar shisheeye. loogu shaqaysan jireyna, si degdeg ah ayaa loo sameeyey, Xeerarkaas oo ay ka mid yihiin: Xeerka madaniga ah, xeerka Habka madaniga, xeerka qoyska, Xeerka Garsoorka ka qayb galka Dadweynaha, Xeerka Iskaashatada Qoreennada, Xeerka Guddiga dhaxalka iyo xeerar kale oo wada muhiim iyo lagama maarmaan waddanka u ahaa. Warkii oo kooban, wax allawixii xeer Garsoor sheegta oo waddankeennu u baahnaa, amase danihiisa gaarka ahi ku jireen, muddadii gaabnayd oo kacaanku jirey, ayaa la wada sameeyey.

Xeerarka cusub oo intii kacaanku Dalka maamulayey haddii aan yare faaleyno waxaan orankaraa sida hoos ku qoran:

b) xeerka Qoysku, waa xeerka luqda Carabiga lagu yiraahdo (Al-Axwaal-shakhsiya) luqda Talyaanigana lagu yraahdo: Diritto Personale). waa xeer gooniiisa loogu camal fala, wuxuuna weligii dhinaca ku hayaa xagga Diinaha, sidaas darteed, ayaa dadyowga Diinta Caabuda, qalaba sidii Diinteedu qabto ugu maamulato; wuxuuna badiba ka kooban yahay sidaan horeyba u soo sheegnay: Nikaaxa, Dhaxalka, Dardaaranka, Waqafka, xannaanada Ilmaha. Nafaqada, iyo wixii kuwaas la xiriira. ujeeddada kacaanka uu ka lahaa xeerka qoyska sameyntiisa in Waddanka xeerar cusub guud ahaan loogu sameeyo ka sokow, waxaa ka mid ahaa,in haweenka Soomaaliyeed, oo qiyaas ahaan Ragga labagoor ku soo laabma, muraalkooda kor loogu soo qaado, oo ayan u muuqan in ay Ragga ka qiima yaryihiin. waxaana run ahaantii caddaatay, in shaqooyinka waddanka laga qabto ay qayb libaax ka qaateen, tan iyo intii kacaanku dhashay, niyadii haweenkuna kor u soo

kaaday raggina ay kaba shaqo wacnaadeen.

T) Xeerka Madaniga

Xeerka Madaniga waa xeer aad u ballaaran una nafci badan wuxuuna nidaamiyaa waxyaalo badan oo ku saabsan, maamulka iyo calaaqaadku u dhexeeysa dadka waddanka deggan dhexdooda, iyo dadka waddanaka iyo Dawladda, iyo dadka waddanaka deggan. iyo dadyowga shisheeyaha ah.

J) Xeerka Habka madaniga ah.

Xeerka habka madaniga ahi, waa xeer aad muhiim iyo lagama maarmaan ah, sababtoo ah, wuxuu fasirayaa oo sharax iyo caddayn u yahay xeerka madaniga ah.

kacaanku markuu qabtay waddanka, wuxuu ku tallaabsaday haddiiba, inuu waddanka u sameeyo xeerar kala gedaisan oo waddanka lagu maamulo, si uu uga xoroobo xeerarkii lagu maamuli jirey muddadii isticmaarka. iyo isticmaar la shaqaystayaalku haysteen kacaanku arrintaas iyada ah. waa ka gun gaarey, wax alla iyo wixii xeerar ah oo laan kasta oo Dawladdu u baahan tahayna, waa sameeyey, si degdeg ah ayuunaugu tallaabsaday.

x) Xeerka Dadweynuhu inuu ka qayb galo Garsoorka.

Kacaanku markuu arkay, in qaylo badani ka taagan tahay xagga Garsoorka, dadweynuhuna Caddaalad darro iyo laaluush aan meel dayad lahayn iyo musuqmaasuq sheeganayo maragna u noqotay, in Garsoorayaal fara badan iyo kaaliyayaal cad lagu qabtay. wuxuu u dhashayba ay ahaayeen danaha dadweynaha iyo maslaxaddooda guud. Sidaas darteed, wuxuu saaray «Xeerka dadweynuhu inuu ka qayb galo Garsoorka» Nasiib wanaag, sidii xeerkaasu u soo baxay, wixii qaylo iyo eed sheegadka taagnaa xagga Garsoorka way baabe'een, laaluushkii dalkoo dhan hortii caamku ahaa hadal hayntiisii waaba la waayey Garsoore dambe iyo Kaaliye la xirana, ama laaluush lagu qabtaana waqtigeedii wuu dhamaaday, Tallaabaaii fadligeedana kacaankii 21 Oktoobar 1969, ayaa iska leh.

Hadalkii oo kooban, dadweynihii Soomaaliyeed, markii ay ogaadeen in maamulkii Caddaaladdoodu gacantooda ugu jiro, oo qof kas-

ta oc iyaga ka mid ihiba, ka qayb geli karo Garsoorkii. ayay maqsuud ka noqdeen, caddaaladdiina ku kalsoonaadeen.

Siyaalahaa aan soo sheegnay. ayaa xeerarkaas iyo kuwo kale oo badan ulajeedadooda iyo waxtarkooduba ku dhasheen. Sidaas oo kale ayaana kacaanku meel kastaba Wasaaradaha, Wakaaladaha, Shirkadaha, Hay'adaha dawladda oo dhan wax alla wixii xeerar ah oo horay u markooda ku habboon ayuu u sameeyey, iyadoo xeerarkaas loo habeeyey, si run ahaan u waafaqsan; Hiddaha, Dhaqanka, Caadaadka, Diinta waddanka iyo Ummaddaba ku habboon kuna hagaagsan.

W. Q. Shiikh Maxamed Maxamuud.

Agaasimaha Waaxda Garsoorka.

AWOODD ISKU QABSI GARSOOR MAXKAMADEED

Sida la ogsoon yahay waddan kasta oo adduunka ka mid ah wuxuu leeyahay Nadaam Garsoor oo habaynaya awoodda Garsoor iyo xibnaha garsoorkaas sida ay u dhisan yihiin iyo mid walba awooddiisu inta ay la ogtahay, annaguna waxaan ka mid nahay waddanadaas, waxaanan leenahay Xeerka garsoorka ee soo baxay 22 seb. 1974 horayna waxaan u lahaan jirney X.N.G. Haddaba, mar haddii ay jiraan xibnahaas Garsoorka oo u qaybsan heer degmo, heer Gobol, heer Rafcaan iyo heer sare, waxaan laga fursanayn in ay dhacdo Awoodda isku qabsi, arrinta awood isku qabsigana waxaa habeeyey X.H.M.S. iyo HHC; hase yeeshee waxaan wax badan la kulmaa ama i soo mara Qareenada qaarkood oo ku doodaya markii ay Maxkamaddu soo saarto amar caddeynaya awood la'aan ama awood lahaansho in dacwadda loogu gudbiyo Maxkamadda Sare si ay u cayinto cidda leh awooddaas Gobol ahaaneed, iayda oo wax diiddo ama oggolaansho ah aan laga helin Maxkamaddii la yiri ayadaa leh awoodda, waxaana dhacday Maxkamadda Sare inay gasho waxyaabo caynkaas oo kale ah, go'aanna ay ka gaartay ayadoon dareensan haba yaraatee arrintaas.

Marka waxay nala noqotay inaan ku qoraa Majallada Xeerka si looga qoodo shaacana looga qaado.

Awood isku qabsi

Awood isku qabsi goormuu jiri karaa si ay Maxkamad Sare u soo dhex gasho? Awood isku qabsi wuxuu u qaybsamaa saddex qaybood:-

1) Tan hore waa in dacwad laga oogaa laba meelood oo xubnaha Maxkamadaha ka mid ah dabadeedna mid kastaaba ay tiraahdo aniga ayaa qaadaya oo leh awoodda qaadista, waxaana la yiraahdaa markii ay taasoo kale dhacdo iskupabsi «II jaabi ah» Positivo waxaana loo shardiyaa (A) in ujeeddada dacwadda la isku hayso isku mid tahay (b) in dacwaddii ay taagan tahay inta laga qaadayo awoodda la isku haysto.

Waxaa kale oo jirta haddii ay dooddii ku dhammaato Maxkamadhii mid ka mid ah Xukun kama dambays ah waxa baaba'aya dooddii isku qabsadka lamana aqbali karo wax dalab ah oo ku saabsan awood isku qabsi in la dhagaysto maxaayeelay waxaan jirin awood isku qabsi oo ka dhex taagan laba Maxkamadood.

Tan labaad waa inay labadii jaho ee Garsoorka oo awoodda isku

haystay ay diiddo inay ka tanaasusho ra'yigeeda oo ay ku dheganaato awoodda oo weliba ay go'aan ku soo saarto inay awooddaas ayadu iska leedahay ayna dhegeysan doonto dacwaddaas.

2) Qaybta labaad oo awood isku qabsi wuxuu imaan karaa markii dacwad laga oogo Laba maxkamo hortood dabadeedna mid kasta ay diiddo galidda ama dhegeysiga dacwadda, markaas waxa jira awood, isku qabsi saabi ah (negativo) markaasna waxaa loo shardiyaa awood isku qabsiga in la helo go'aan ka soo baxay labadii Maxkamadood oo caddeynaya awood la'aanta (Incompatenza) si loo ogaado Maxkamaddhii in awoodda ay diideen. Haddii anay sidaasi dhicinna Maxkamaddii kala saari lahayd awood isku qabsiga ma soo geli karto.

Qaybta 3 Xaad ee adood isku qabsiga waxay tahay:

1— Inay laba Xukun oo is burinaya ay ka soo kala baxaan Maxkamado. Qodobka 26 X.M.M. Wuxuu sj. caq u sheegayaa in uu awood isku qabsi jiri karo oo kali ah markii Maxkamado ay ku doodaan awood darteed.Sidaas si la mid ahna waxaa caddeynaya Q. 9 XHMC. Marka Xukunka Maxkamadda Sare ee ku saabsan caddeyn la haansho awood Maxkamaddeed ayadoon labadii jaho ee Maxkamaddu go'aan awood ku saabsan ka soo wadabixin waxaan dhihi karraa wuxuu khilaafsan yahay habka awood kala saaridda ee ku cad Q. 26 X.C.S. Isla mar ahaantaas soo gudbinta Maxkamadda Gobolka ay u soo gudbisey Dalab caynkaas ah isagana wuxuu khilaafsan yahay habka awood isku qabsiga Maxkamadeed.

Tillaabada noocaas oo kale ah waxay u muuqataa in ay degdeg tahay oo ay ka hor martay meeshii ay ku habboonayd oo ah in la helo awood isku qabsi buuxa oo oofsaday sharuuddaas aan kor ku soo sheegnay Waxaana wanaagsan in Garsoorayaasha qaba ra'yi kale in ay ku soo bandhigaan Majallada Xeerka.

Qore: Cabdullahi Daahir Barre

Guddoomiyaha Max. Gobo. Banaadir

Mushkiladu ma aha tadbiiqa Qaanuunka ee waxaa weeye habka leesu guursado waqtiga la joogo taasoo dooneysa in laga hortago si loo helo Qoys dhisan. Iminka waxaan tusaalooyin ka bixinayaa dhibaatooyinka ka timaada guurka, keentaana furidda.

B) In laba ruux is guursadaan iyadoon labada midna heysan Hanti iyo shaqo, oid ay la kaashanayaan ayna jirin, ayadow Ninkii ku leeyahay inantii uu guursanaayay Bisha soo socota ayaan Shaqo helayaa oo aan aqal gelaynaa ee guurkeygu ha noqdo mid qarsoodi ah taasoo ayna ku oran markii aad Shaqo heshid ee aad sameysid guri ayaan is guursaneynaa, markii Inantii uu ku qanciyo hadalkiisa khiyaaliga iyo Riyadda ku dhisnaa: kol kaas waxaa dhacda in ay is raacaan oo laba Ruux oo ay saaxiib yihiin u yeertaan. kuwaasoo ay saaxiib ku yihiin oo ay isku fikrad yihiin saas baa lagu mahrjyaa, waxaa dhacda markii ay ka soo wareegto qabitaankooda muddo dhan lix Bilood oo kaliya ee Ninkii shaqo heli waayo ee Inanta reerkeedina ogaado Meherka Qarsoodiga ah ayay Inantii reerkeed. Eryaan ayakoo ku Canbaareynaya Meherkaas qarsoodiga ah ee khiyaaliga. Inantii markii ay u timaado Ninkii ay arrintii usheegto ayuu ku yiraahdaa wax Guri ah oo diyaar ahj majiro sababtoo ah shuruudooda ay ahayd in ay Aqal galaan markii uu helo shaqo, Inankii wax shaqo ah ma helin, halkaas ayuu khaskii ka bilaawdaa oo ay Maxkamadda isla yimaadaan ayadow dacwooneysa in uu beenbeen ku Mehersaday debadeedna halkii ay isku furaan Awoodarro awgeed.

T) Waxaa dhacda in Ninku guursado isagoo shaqo heesta mushaarkiisu yahay 340 shilin ilaa 600 shilin oo aqal awdiisa ah la gale. dabadeedna naagtiina aqalkii ka soo cararto bil dabadeed oo ay Maxkamadda dacwad u soo qorato iyadoo ku daoodeysa in aysan aqal heysan marka loo yeero Ninka wuxuu ku jawaabaa aqal waan geeyay haddii doonayso Maxkamaddu ha soo Eegto, markii la tago guriga waxaa caddaata in uu Ninku heysto aqal awooddiisa ah ay doonayso naagtu Alaabta Guryaha Ja dhigto ee qaaliga ah taasoo aan ahayn Ninka awooddiisa sidaas ku dhacdaa furista.

J) Waxaa jirta in qoysaska qaarkood oo is qabaan jn aysan u Madax banaaneyn arrimahooda qoys ee gaar ahaaneed maxaa yeelay Ninka iyo naagtaba waxay ka dambeeyaan reerkooga mid walaba waxaa lagala taljyaa xagga Reerkiisa, haddii aan wax ka soo qaato xagga reerka

Haweenayaa waxaa dhacda in Ninka laga wato Afadiisa iyakoo waaa haqnaya amba ay aaddo reerkooda dibna aysan u soo noqonin wadashadaas amaba ka tagiddaba waxa ka dhasha khilaaf iyo is afgarasha waa. ugu dambeestii ay kula tagaan Ninka iyo Afadiisa sidaas oo kale kale waxaa dhacda in Ninka reerkiisa ayaguna ku yiraahdaan jska fur Naagta waayo nala ma heshiin karto.

X) Waxaa dhacda in dhallin yarada qaarkood ay isu guuriyaan Waalidadood markii ay mudda ka soo wareegto wada nooshadaas waxaa dhacda in ay is afgaran waayaan sababtoo ah iyakoo aan u bislayn mas' uuliyadda Qoyska ha noqoto xag dhaqaale ee ku culus asaga iyo reerkiisaba iyo bulshadow waxna u qaban karin saas bey ku kala tagaan.

Kh) Waxaa dhacda in Naagtu ay ka boodsan tahay danta oo ay doonayso dhar qaali ah dahab amase Ninku uu ka boodsan yahay dantiisa oo laeagtiisa uu ku bixiyo wax aan loo baahnayn oo ah khamri, qaad iyo Naaga kale oo uu la tunto ilaa intii ay ka dhacdo in uu bixin kari waayo masruufkii saasna lagu kala tago.

D) Waxaa dhacda in Ninka iyo Naagta ay ku kala Sarreeyaan xagga Tacliinta, Fikradda iyo da'daba, taasuna ay keento furitaan waayo lays kuma keeni karo.

Inkastoo ay jiraan sababahaas aan kor ku soo sheegnay Tirakoobka Sannadkaan 1976kii: guurka 5046 furitaanka 2560 isku Noqoshada Rajiciya 136 .

Qore Garsoore Axmed Mac. Xasan Jumcaale.

Maxkamadda Guurka iyo Furinka ee Dawladda Hoose

FAALOOYIN XUKUNNO KU SAABSAN

DACWADDA MADANIGA AH EE DAWLADDA DHINAC KA NOQON KARTO IYO XIRIIRKA KA DHEXEEYA XUKUNKA CI-CAABTA AH IYO DACWADDA MADANIGA:

Wuxuu Yaasiin Xaaji Xuseen ku qoray Majallada Xeerka cadadkaadii 9aad ee bisha Luliyo 1976 faalooyin xukunno maxakamadaha dalka ka soo baxay.

Sida runta ah Yaasiin aad iyo aad ayuu ugu mahadsan yahay tallaabadaas ay qaaday, waayo runtii, taasu waxay ka dhalinaysaa xeeryaqaannada dhexdooda doodo iyo faalooyin miro wanaagsan u keeni karta garsoorka iyo fiqigaba.

Sidaan filayo faallooyinkaasu waxay u qaysanaayeen labo qaybood. Tan hore waxay ku lug leedahay qaanuunka Lam. 14 taariikh 4.2.76 kaasoo sida runta ah maxkamadaha qaarkood si aan habooneyn u fahmeen.

Haddeynu ku noqono qaanuunkaas qodobkiisa hore wuxuu leeyahay «dacwoodaha madaniga iyo kuwa idaariga ah (civil and aministrative cases) ee Dawladdu dhinac k tahay waxaa awood loo siiyey Maxkamadda Badbaadada Dalka oo keli ah».

Shakj kuma jiro in uodobkaasu siiyey dacwadaha madaniga ah ee dawladdu dhinac ka tahay awooddeeda Maxkadda Badbaadada Dalka. Hase yeeshee noogaa waxaa faallo u baahan baad mooddaa, goorta la oran karo dacwad dawladdu dhinac bay ka tahay. Dhinacse maxaa loo ga jeedaa? Ma markay dhinac asal ah ka tahay dacawadda baa loola jeedaa oo qudh ah mise xataa mararka ay u dumeyso dhinac kalena waa la mid?

Waxay nala tahay dacwadda madaniga ah haddii dawladda lagu furto, ama cid kale ayadu ku furto, dacwaddaas iney dhinac ka tahay cidi iskuma hayso, waayo markaas waa dhinac asli ah, laakiin dacwadu haddaay dhinacyo kale ka dhexsocotey kaddibna dawladda la soo geliyo ama ay soo gasho iyadoo danaheeda ilaalineysa, markaas ayaa maanka galyaqaannadu ku kala baydheen.

Yaasiin wuxuu kala saarayaa markay dawladdu dhinac asli ah ka tahay dacwadda iyo marka ayan dhinac asli ah ka ahayn, oo ay goor dambe dacwdda soo gashay, oo marka hore ma ahee, marka dambe wu-

xuu qaabaa in dacwaddaasoo kale Maxkamadda Badbaadadu ayan lahayn (ka fiiri faalladiisaas qaybta hore).

Si kastaba ha ahaatee, annagu waxaannu qabnaa in dacwadda, haddayba dawladdu dhinac ka tahay inaan loo fiirin dhinac asli ah inay ka tahay iyo in kale ee awoodeeda waxaa leh Maxkamaddaas Badbaadada sida uu qorayo qaanuunkaas (lr. 14) kor ku tilmaaman sababtoo ah, waa mare: si guud ayuu u hadlayaa oo ma kala saarayo qaanuunkaas dhinac asli ah iyo mid kale. Waa mar labaade, kala saariddaasu xjkmad kumafadhido waayo, marba haddii dacwadda ay soo gasho dawladda dhinac kastaba ha la jirtee) ama ha la soo geliyo xukunka dacwaddaas ka soo baxaa xujo ayuu ku noqonayaa ama uu u noqonayaa. Sidaas baa kol haddii la kala saaro dantii xeerdejiyuhu ka lahaa qaanuunkaas lam. 14.4.2.75 u dhimaysaa.

Hase yeeshee, runtii waxay tahay, sida uu tilmaamay Yaasiin, in hirgelinta qaanuunkaas sidii loo rabay aan la samayn oo maxkamadaha badankood ayaan marin habka hufan oo caafimaadka qaba.

Tusaale ahaan haddeer, xukunkaas hore ee Yaasiin tilmaamay Wakaaladda Caymisku hor dhinac kama ahayn dacwaddaas, gadaalna dacwaddaas uma soo geljn, waayo doodda uu ku dooday qof dacwaddaas ku jiray in baabuurka dhibaatada geystay ku jiray caymiska, hadalkaas keligiis dawladda dhinac uga dhigimaayo dacwadda, waayo waa in si rasmi ah loo dalbadaa jney sharikaddaasu ka soo qaybgasho dacwadda, tallaabooyinka xeer habka uu qorayana la maraa markaas kaddib oo uu caymisku ka noqdo dhinac dacwadda ayey maxkamaddda ku haboonayd go'aankeedaas inay qaadato.

Maxkamadaha qaarkood sida runta ah waa iska mala awaalaan, markii dawladda la soo badal qaadaba, waxayna gocshaan inay dhinac ka tahay iyadoo run ahaan dhinac dawalddu ka ahayn.

Tusaale ahaan waxaa dhaeday dacwad saddexda maxkamadood ay ka weecdeen qaanuunka, dacwaddaasuna waxay ku soo kocban tahay Ninkna baabuur ninkii lahaa waday ka dhacay, markaasuu dacwag madani ah Maxkamadda Gobolka Bay ka furay isagoo dalbaya in loogu xukumo dacweysanahaas magdhow dhibaato ka gaartay baabuurkaas darteed. Dacweysanuhu waa diidsanaa usagoc ku doodaya in aanu ninkaas saarin kana warqabin, dhibaadana sidaas darteed isagaa isku keenay, baabuurkana khushigiisa uga booday. Maxkamaddaasu go'-

aan waxay ku gaartay, markii marag la dhgeystay inay ku xukuntay dacweysanaha magdhawga qaarkiis (Shs. 1000), sharikada caymiska oo aan qofna soo dhexgelin dacwaddaas iyaduna soo gelinna, lana dacweynna waxay ku xukuntay magdhawga qaarkiisii kale (2.000 shilin.

Haddaba labadii dhinac iyo Wakaaladda Caymiskuba rafcaan ayey u qaateen Maxkamaddaa Rafcaanka Bay, isagoo rafcaanlaha hore ka cabanaya in lagu xukumay lacagtaas aan lagu lahayn, kan labaadna saluugaya intii loo xukumay, sharikadda Caymiskuna ka doodaysa lacagta lagu xukumay iyadoo dacwadda dhinaca ka ahayn, dhinacna soo gelin.

Maxkamaddaas rafcaanku waxay qaadatay go'aan yaab leh, waayo waxay goysay, iyadoo cuskanaysa qaanuunka kor ku tilmaaman (LDr.14 taariikh 4.2.75 in dacwadda maxkamadda Badbaadada loo wareejiyo, markay caddaysay in xukunka Maxkamadda Gobolka baaba'yahay sababana waxay uga dhigtay in Maxkamadda Gobolkaasu awood dacwaddaas u lahayn. waxaase dhacday Maxkamadda Sare iyaduna inay ayiday xukunkaas Maxkamadda Rafcaanka kuna ayiday asbaabtiisa?!!!

Runtii Maxkammadda Gobolkaasu waxay ku gaftay inay xukunto qof dacwadda dhinac aan ka ahayn, layskumana soo qaadin (fiiri 77x. h.m.) oo Maxkamadda Rafcaanka waxaa la rabay in gofkaas ay saxdo. qaar jebiso xukunkaas oo magdhawga caymiska tuurto kaddibna wax ka tiraahdo dulucda dacwadda ee dacweysanaha iyo dacwoodaha ka dhaxaysa. Inse yeeshee Maxkamadda Rafcaanku iyadaba waa gaftay waayo: rafcaanka waxa laga soo qaatayba ma eegin ee waxay mala awaashay in dawladdu (sharikadda caymiska) dacwaddaas dhinac ka ahay. **Runtii dacwaddaas dawladdu dhinac kama ahayn sidaynu sheegnay Maxkamadda hoose magdhawgaas** ayey isaga xukuntay sidaas darteed **Maxkamadda Sare, haddii tii Fafcaanku** khaladkaas ku dhacday waxaa la rabay in ay saxdo oo baabi'iso xukunkaas Maxkamadda Rafcaanka. asbaabtaynu soo sheegnay dartood. umartana in mar labaad dacwadda qaaddo, saxdana xukunkaas Maxkamadda Gobolka Bay ee ma ahayn inay ayiddo oo ku ayiddo asbaabtiisa gafka ah.

Si kastaba ha ahaatee Maxkamadaha sharafta leh waxaa u fiicnaan lahayd in ya ka fiirsadaan qaanuunkaas lam. 14 taariikh 4.2.75 iyo goorta la dabiqikaro iyo tallaabooyinkay u baahantahay hirgelintiisu

Qaybta 2aad ee faalladaas Yaasiin waxay ku lug leedahay dacwadda madaniga ah markay raacsan tahay tan ciqaabta ah; iyo inay socon karto hadday dhacdo tan ciqaabta ahi iyo in kale iyo iney xoog ku

leedahay taas ciqaabta ahi tan madaniga ah markaasoo kale.

Yaasiin xukunkaas uu uga faallooonayo qaybtaas labaad si fiican meelaha uu wax ka sheegayo uma caddeyn, ra'yigiisana si cad uma bandhigine waa kor meeray. Si kastaba ha ahaatee, waxaad u malaysaa in Yaasiin qabo haddii dacwaddaas dhinaceeda ciqaabta ah noqday mid dhammaaday (Passato in giudicato) inaan rafcaan dhinaca madaniga ah laga qaadan karin. isagoo weliba tilmaamaya waqtiga rafcaanka la qaatay.

Runtii annaga waxay nala tahay in dacwadda madanlga la wadi karo qof kasta oo maslaxad ku leh in u bannaantahay in uu wado oo uu rafcaan ka qaato, hase yeeshee waxaa isbeddelaya oo qudh ah, habkii iyo nidaamkii lagu waday markii hore. Waayo markii hore waxay raacsanayd tan ciqaabka ah, haddase waa madani qeexan inkastoo isla maxkamaddii ciqaabka ahayd qaadayso dacwadda. Sidaas waxaan u leeyahay, haddii tusaale ahaan, dacwaddaas rafcaan ay ka qaadan lahaayeen eedaysanaha ama X.X. Guud; dhinaca dhibaatadu gaartay (Parte offesa) hadduu rabi lahaa inuu qaato usaguna rafcaan, waxaa waajib ku ahaan lahayd in uu usaguna la qaato rafcaankii isla muddada dacwadda ciqaabta tan ahna dhawro, waayo tanmadaniga ah markeer waxay la socotaa tan ciqaabka ah waxayna qaadanaysaa tan ciqaabka ah habkeeda meela yar yar mooyaane.

Qodobka 220(2)x.h.c. Wuxuu ka hadlayaa marka X.X. Guud iyo eedaysanuhu midkoodna qaadan rafcaan, ee dhinaca dhibaatadu gaartay rafcaanka ka qaato xukunka dhinaca madaniga ah. wuxuuna caddaynayaa. markaas oo kale in lagu dhaqi doono saldhigyada xeerka madaniga haddiiba la dabaqi karayo, oo tusaale ahaan, markaas oo kale, muddada rafcaanku waa soddon maalmood oo laga bilaabo maalinta dhinacaas xukunkaas la ogeysiiyo, haddaanse la ogeysiin xukunka dhinacaasu wuxuu rafcaankaas qaadan karaa hal sano dhexdood, laga bilaabo maalintii la faafiyey xukunka oo waxaan uga goleeyahay in la dabaqayo markaa oo kale qaanuunka madaniga lana wadikarayo dacwaddii dhinaceeda madaniga ahaa. haba noqdo dhinaca ciqaabka ah, hadduu doono mid dhammaaday waayo xaq ma aha in rafcaan dhinaca dhibku gaaray qaadankariwaayo, sidaasna xukunkii ku xirmo haddiiba eedaysanuhu ama X.X.I. Guud aanu qaadan rafcaan.

Waxaa haray inaanu sheegno in markaas oo kale, ee Xukunka dlhiniciisa ciqaabka ahi dhammaado, in dhinacaas Ciqaabka ahi xoog

ku lahayn dhinaca madaniga ah, waayo qodobka 403 X.M. iyo Qodobka 273,274 X.H.C. waxay ka hadlayaan dacwad madani ah oo asli ah oo gacnideeda loo qaadayo ee ma aha sidaan oo kale. Sidaas baa kolka Maxkamadda Rafcaanka ahi markay qaadayso dhinacaas madaniga ah oo kali ah u baari kartaa caddeyn cusubna moogu hor marin kara kana ra'yidhiiban kartaa dacwaddoo idil sidii Maxkamadda hoose, waayna ka soo saari kartaa dhinaca madaniga ra'yi khilaafsan kan Ciqaabta, oo xukunkaas dhiniciisa Ciqaabta inkastoo dhammaaday, dhinaca madanigii ma dhammaan, oo iney Maxkamadda Rafcaanku ka ra'yi bixiso waa waajib. awood bayna u leedahay inay falan-

qayso xataa kan ciqaabka ah si ay u soo saarto mid khilaafsan Xukunkii hore, iskhilaafka labada Xukuna iskhilaafeen markaas oo kale ma aha dalool qaanuunka ku jira ee waa ceeb ku lug leh hirgelintiisa oo waxa la rabay in Xeer Hadiyaha Guud ka [illegible] Rafcaan. Waayo inkastoo dacwadda labadeeda dhinac (Madani iyo Ciqaab) ka dhasheen sabab keli ah, hase yeeshee qulucdeedu weys khilaafsan tahay. Tan kalana, haddiiba qaanuunku siiyey dhibanaha inuu rafcaan qaadan karo Xukunka dhinaca ku saabsan Xuquuqdiisa madaniga ah macnahiisu waxa weeye inuu Maxkamadda Rafcaanka siiyey inay dacwadda wax ka tiraahdo dhammaanteed, sidii tii hoose wax xidhidhana aysan jirin.

Qore Maxamed Axmed Cumar

La taliyaha Maxkamadda Sare

DHALIILID XUKUN KA SOO BAXAY MAXKAMADDA SARE

Waxaan Guddiga sharafta leh u sheegayaa in nin la yiraahdo Naaraan Laaji Daanji, 31 jir ah, uu si sharci darra ah u naagaystay gabadha la yiraahdo Raxma Macow Xasan, 13 jir ah, kadib markii uu gurigiisa dhexdiisa kharma ku siiyey markii ay sakhraantayna uu naageystay.

Markii arrinta la keenay Maxkamadda Gobolka Banaadir wuu qirtay inuu gabadha naagaystay isla markaana wuxuu Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud keenay markhaati caddaynaysa in eedeysanuhu gabadhaas kharma siiyay aqalkiisana la galay oo ku xidhay kana soo baxday iyadoo dhac dhacaysa iyo Refeerto muujinaysa in loo tegay Raxmo.

Caddayntaas aan Maxkamadda hor keenay way ku fiilaatay Maxkamadduna waxay eersanaha ku xukuntay 10| sano oo xarig ah markii ay u aqoonsatay inuu u gafay qod. 398 X.C.S;

Eersanuhu wuxuu xukunkaas ka qaatay racfaan, waxayna Maxkamadda Racfaanku ku xukuntay ka 7| sano oo xarig ah m arkii ay u aqoonsadeen inuu denbiila yahay.

Eersanuhu mar labaad ayuu rafcaan ka qaatay xukunkii lagu eedeeyey, hasa yeeshee Maxkamadda Sare si qaloocan oon sharciga waafaqsanayn u bedeshay qod. 405 X.C.S. waxayna ku xukuntay 2 sana oo xarig ah iyo 1.000 shiiin oo ganaax ah.

Haddaba haddii aan sida denbigu u dhacay fiirino taas oo kor ku soo sheegnay waxaa si dhab ah oon shak ku jirin u muuqata inuu u gafay qodobka 398 X.C. maxaa yeelay wuxuu qodobkaasi leeyahay: «Ninkii xoog ama handad ku fuula naag waxaa lagu xukumayaa 5 laga b laabo ilaa 15 sano». Qodobkaas xubintiisa labaad waxay leedahay: «Ninkii naag aan ahel u ahayn raal.nimo (naag waalan ama miyir la' oo suuxsan ama khamraysan amase aan qaan gaadha ahayn) ama saga dhiga qof uusan ahayn waxaa lagu ciqaabayaa 5 sano ilaa 15 sano oo xarig ah».

1. Haddaba haddii aynu rabno inaynu kiskan ku dabaqno qodobkaas waxaan inoo muuqata in eersanuhu gabadha uu kuday oos naagaystay, iyada oo miyir la', isla markaas ma aysan ahayn qaangaar oo waxay ahayd 13 jir.

2. Qod.405 X.C. waxaa looga dan leeyahay in la cirib tiro shar-

muudnimada oo ah in laga baayac mushtaro jir (jidhka) naagaha. Haddaba nin denbigaas ma gel. karo maxaa yeelay jirkiisa uma aha caado inuu nin ka baayac mushtaro ee waxaa geli kara naag oo qur ah. Balse aan u raacno maxkamuddu sida ra'y.geeda ah nin iyo naagba ay denb.gaas geli karaan, maxay maxkamadu u xukumi wayday Raxmo Macow oo maxaa ku kalifay inay Naaraan Laaji Daanj. keligi xukunto?

Waxyaalahaas oo dhan haddii aan f.iriyay iyo danta guud oo ku jirta inaan xeerka dalka u degsan la khilaafjn iyo inuu xukunku caddaaladda waafaqsanyahay, waxaan ka qaadanaynaa racfaan aan caadi ahayn xukunka Maxkamadda Sare ee uu ku eedaysanyahay Naaraan Laaji Daanji, anagoo codsanayna in la baabi'iyo xukunkaas khilaafsan xeerka iyo runta.

(Jaalle Dr. Maxamed Xasan Taani) Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

FAALLO KU SAABSAN SHARCIGA QOYSKA IYO GARSOORKA DADWEYNAHA

Waxaan jacelahay inaan wax idiinka sheego Sharciyada soo baxay intii Kacaanka barakaysani jirey, kuwaasoo aan taataabndoono kuwooda aad qiimaha u leh. Qawaaniinta aad qaayaha u lihi wey fara badan yihiin, hase yeeshee waxaan ka soo qadanayaa inta khusaysa Maxkamadaha.

Xeerka Madaniga iyo Xeerka Habka Madanigu waxay mideeyeen Sharciyadii Gobolka Koonfureed iyo Gobolka Waqooyi lagala kala dhaqmi jirey, waxaanay fududeeyeen socodsiintii Caddaaladda.

Xeerka Nidaamka Garsoorku isaguna wax weyn ayuu u tarayaa Nidaamka iyo Habka Maxkamadaha iyo Wasaaradduba u shaqaynayaan oo hore uma jiri jirin qorshayn inta Garsoore iyo inta Kaale ee Maxkamadaha looga baahan yahay.

Hashe yeeshee ujeeddada aan ka leeyahay faaladan waxay tahay inaan wax ka sheego Xeerka Garsoorka Dadweynaha iyo Xeerka Qoyska.

(1) XEERKA QOYSKA:

Sida la ogsoon yahay 9kii sano ee ka horreeyey dhalashadii Kacaanka iyo intii Guumaystuhu Dalka joogay, waxa jirtey in Maxkamaduhu dhib weyn ku qabeen Garsooridda Qoyska, taasoo ay ugu wacnayd inaanu jirin wax nidaam ah oo la raaco oo u dhignaa Qoyska. Waxa dhici jirtey in Garsoore waliba uu ayido Kitaabka uu akhristay, taasuna ku ridday Garsoorayaashii jaahwareer, hase yeeshee iyadoo ay ka mid tahay guulihii waaweynaa ee Kacaanka barakaysani gaadhay waxa soo baxay Xeerka Qoyska. Xeerkaasu wuxuu mideeyey Kutubtii faraha badnayd ee Garsoorayaashu ku jaahwareern, islamarkaana wuxuu baabi'iyey khilaafkii badnaa ee dhexyaalay Garsoorayaashii.

Xeerkaasu wuxuu kaalin weyn ka qaatay dhismaha Bulshada Soomaaliyeed, maxaa yeelay hortii waxa dhici jirtey in Qoysku si fudud u baabi'i jirey koika labada qof isfuraan sabab la'aan ama ninku intuu doono kaguursado dumarka isagoon awood dhaqaaleed u lahayn, taasuna keeni jirtey inay lumaan caruurta Soomaaliyeed iyo halkaas in qoyski ku rogmado.

Hase yeeshee waxa dhacday in Afmiinshaarku ceebeeyo Xeerkaas isagoo sheegaya inaan cid isfuri kartaa jirin cid isguursan kartaana jirin.

Arrimaha Afmiishaarku sheegay waxa beeniyey Qodobada 13, 36 iyo 43 ee xeerkaas oo sheegaya in laysfuri karo laysna guursan karo.

Sidaas darteed waxaan leeyahay mar labaad Xeerkaasu wuxuu u dhashay ama u soo baxay dhismaha Bulshada Soomaaliyeed maxaa yeelay sida haantu gunta uga tolanto ayaa Bulshaduna ka dhisantaa Qoyska.

Intaa waxaan ku dari lahaa in Xeerka Qoysku si fiican uga hirgalay Degmada Burco kaddib kolkii aanu tababarro isdabajoog ah uga furnay Culumada iyo Guddiyaasha Xaafadaha, Maxkamadihii aad iyo aad uga nasteen dhibihii haysan jirey.

(2) XEERKA GARSOORKA DADWEYNAHA:

Waxa jirtey in laga faafiyey dacaayad Xeerka Dadweynaha kolkii uu soo baxay, taasoo la yidhi waxa Maxkamadihii la fadhiisiyey dad jaahiliin ah, hase yeeshee waqti yar kaddib waxa muuqatay in ruux kastaa fahmay ulajeeddadii laga lahaa Xeeraas, taasoo waafaqsanayd Warqaddii kobaad iyo tii labaad ee Kacaanka barakaysan. Waxa dhacday in markii Dadweynuhu fahmay inay beeneeyeen ceebtii ama eeddii loo jeedin jirey Garsoorayaasha iyo Wasaaradda Garsoorka labadaba, taasoo loo haystey inuu yahay ninka Garsooraha ahi nin keligiitashada ah oo wuxuu doono yeela wuxuu doonana qaata oon ahayn nin meesha u fadhiya Caddaalad. Hase yeeshee waxa dhacday in markii ay fahmeen ay dadkii ku faafiyeen wanaaggiisii. Waxa kaloo ay isku hanuuniyeen inay iska daayaan maragga beenta oo Maxkamadaha runta u sheegaan si Maxkamada ay ugu fududaato hawshoodu oo ay runta u helaan. Sidaas darteed Xeerkaas guul weyn ayaa laga gaadhay, guushaasna waxa iska leh Ilaahay iyo Kacaanka barakaysan.

Ugu dambayntii, labadaas Xeer kaalin weyn ayey ka galeen in la dhiso Bulsho Soomaaliyeed oo caafimaad qabta iyo in lagu xukumo Caddaalada iyo Sinnaan.

(Dr. Maxamuud Cabdi Axmed)

Guddoomiyaha Maxkamadda Degmada Burco,

Gobolka Togdheer.

JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMAALIYEED

MAXKAMADDD GOBOLKA BENAADIR

MAGACA DADWEYNAHA SOOMAALIYEED

Maxkamadda oo ka kooban:-

1) Cabdullaahi Daahir Barre ———— Guddoomiye

2) Xaawa Cabdulle Nuur ———————Xubin ————————

3) Abuukar Xaaji Maxamed ———————— Xubin ————————

Waxay ka soo saartay

X U K U N

dacwadj madaniga ahayd ee ka dhaxeysay:
Caacsha Salaad Xersi-Qareen Xasan Sheekh Ibraahim-Dacwooto

I Y O

Cali Maxamed Xalane-Qareen Maxamed Cabdalla-Dacweysane-

SIDII WAX U DHACEEN

Dacwootada dacwadeedi taariikhdeedu ahayd 20. 11. 75, waxay ku soo weydiistay **Maxkamadda in loogu xukumo dacweysanaha** Maxamed Cali Xalane magdhaw lug jabtay, iyo kharajkii ka gaaray jabkaas, ayadoo qadarineysa magdhawgaas, ha la raaciyo kharajkii dacawada iyo xushmadii Qareenka. **Dacwootada waxay u cuskatay qod. 171 X. M;** Maxkamaddu doodi ay qabatay 22. 4. 76, labada dhinac waxay sheegeen **in ay isku dayayaan heshiis, Maxkamadda waxay muddo siisay ilaa** 6. 5. 76;

